

Tamarta loogu talagalay guryaha halka-qoys:

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato



TILMAAMA HAN



Talaabooyinka Keydinta

Ku keydi tamarta iyo lacagta talooyinka fudud



Fahan biilasha

Baro biilashaada korantada iyo kharashyada guud



Xiriirada & Wadahadalka

Hel taageero iyo caawimaad la xiriirta tamarta

Baro sida aad ugu keydin karto tamarta iyo lacagta guriga, cida aad la xiriiri karto si aad uheshid caawinaad, iyo sida loo fahan biilka adeega.



CERTS

CLEAN ENERGY RESOURCE TEAMS



Xiriirada tamarta aan isticmaalo

Buuxi magacyada iyo macluumaadka xiriirka ee barnaamijyada tamarta & bixiyeyaasha

Korontada iyo Gaaska Dabiiciga ah Adeegyada kuu shaqeeya ayaa laga yaabaa inay ku siiyaan qiimeyn xagga tamarta ah, aalado tamarta keydiya, iyo lacag celin. Waxay sidoo kale kusiin karaan celceli ka kharashka xilliyeedka, waxayna kuu gudbin karaan hay'adaha maxalliga ah si ay kuu taageeraan.

Adeeg koronto: Ka fiiri biilka, wac hoolka magaalada, ama booqo

<https://mn.gov/puc/consumers/utility/>

Adeeg: _____ **Telefoonka:** _____

Bogga: _____

Adeega Gaaska ama Ibiyaha Shidaalka La Keenay: Ka hel gaaska

<https://blueflame.org/whos-my-utility>

Adeeg: _____ **Telefoonka:** _____

Bogga: _____

Barnaamijka Caawinta Tamarta Haddii aad dhibaato ku qabtid bixinta biilashaada tamarta, Barnaamijka Caawinta Tamarta ee gobolka ayaa laga yaabaa inuu kaa caawiyo kharashaadkaaga tamarta. Ka raadi adeeg bixiyahaaga

<https://mn.gov/commerce/energy/consumer-assistance/eap-providers/>

Adeeg bixiye: _____ **Telefoonka:** _____

Bogga: _____

Kaalmada Cimileynta Haddii aad dhibaato ku qabtid bixinta biilashaada tamarta, Weatherization Assistance ayaa laga yaabaa inuu kaa caawiyo yareynta kharashyada tamarta ee keedinta kuleylka, kululaynta, qalabka, iyo inbadan. Ka hel adeeg bixiyahaaga

<https://mn.gov/commerce/energy/consumer-assistance/wap-providers/>

Adeeg bixiye: _____ **Telefoonka:** _____

Bogga: _____

Citizens Utility Board CUB waxay kaa caawin kartaa inaad fahamto biilkaaga korontada ama aad wax ka qabato su'aalaha ama cabashooyinka la xiriira.

Lambarka taleefanka: 844-MINN-CUB (844-646-6282) **Bogg:** <http://cubminnesota.org>

Kooxaha Ilaha Tamarta Nadiifka ah ee (CERTs) CERTs waxay leeyihiin ilo kala duwan oo ku saabsan iskufilnaansho tamart iyo tamarta dib loo cusboonaysiin karo.

Bogga: <https://www.cleanenergyresourceteams.org>



Tamarta Xaaladaha Degdega ah



Waxa La Sameeyo Haddii Foornadaadu shaqeyn weydo oo aadan awoodin inaad dayactir ku sameyso

La xiriir Barnaamijka Caawinta Tamarta. Tani badanaa waa Wakaaladda Waxqabadka Bulshada ee deegaankaaga, oo aad ka heli karto halkan:

<https://mn.gov/commerce/energy/consumer-assistance/eap-providers/>

Waxa La Sameeyo Haddii Adeegyadaadu Xirmaan (ama aad ku dambeyso bixinta)

La xiriir adeeggaada. Sharciga Cimilada Qabow ee Minnesota (CWR) waa sharci dowladeed oo kaa ilaalinaya in adeegga korontada ama gaaska dabiiciga la xiro inta u dhexeysa Oktoobar 15 iyo Abriil 15. Haddii aad ku dambeyso bixinta biilashaada korontada ama gaaska dabiiciga ah, la xiriir shirkaddaada korontada si aad u ogaato haddii aad u-qalanto ilaalinta CWR, iyo inaad isqorto. Difaaca CWR waxaa heli kara oo keliya macaamiisha degan. Dhammaan gaaska dabiiciga iyo adeega korontada waa inay bixiyaan ilaalin CWR. Si aad u hesho difaac CWR, waa inaad dejiso qorshe lacag bixin oo aadna haysato. Haddii aadan ilaalinin qorshaha lacag bixinta waa lagaa jari karaa. Waad dejin kartaa qorshaha lacag bixinta CWR wakhti kasta inta lagu jiro xilliga CWR. Adeegu waa in uu dejiyo qorshe lacag bixin oo macquul ku ah duruufaha qoyskaaga. Haddii adiga iyo adeegu ku heshiin weydaan qorshe lacag bixin ah, la xiriir Komishanka Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota lambarkan 800-657-3782, ama iimayl u soo dir consumer.puc@state.mn.us wayna kaa caawin karaan inaad la shaqeyso adeeggaada.

Bogga: <https://mn.gov/puc/consumers/shut-off-protection>

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Barnaamijka Gargaarka Tamarta ee deegaankaaga si aad u hesho caawinta biilasha tamarta. Raac linkiga hoose si aad u aragto haddii aad u-qalanto Barnaamijka Caawinta Tamarta Guri Dakhliga Hoose (LIHEAP). Haddii dakhligaagu aad uga sarreeyo in aad uqalmatid, waa inaad weli la shaqaysaa adeega si aad u dejiso qorshe lacag bixin ah. Waa inaad ku dhegan tahay qorshaha lacag bixinta. Haddii xaaladdaadu isbeddesho oo aadan awoodin inaad sii wadato, waa inaad mar kale la xiriirtaa adeegga si aad u samayso qorshe lacag-bixin cusub.

Bogga: <https://mn.gov/commerce/energy/consumer-assistance/energy-assistance-program/>



Ogow Intaadan Ibsan



Kormeer Guriga

Ka soo qaad in guriga la iibinayo “siduu yahay.” U fiirso inuu baaro xirfadle xubin ka ah ASHI ama InterNACHI. Waxa kale oo fikrad fiican ah in la codsado biilalkii hore ee adeegga si loo qiyaaso kharashka kuleylka iyo qaboojinta guriga, maadaama biilasha badan ay tilmaami karaan in loo baahan yahay hagaajinta tamarta.

Waxaa jira afar meelood oo ku yaal guri leh fursadda ugu sareysa ee keydinta tamarta cimilada gobolka Minnesota — sida ay u kala mudan yihiin xagga hoose - ee ay tahay inaad kormeerto ka hor intaadan iibsan.

- 1 Dahaarka Hawada:** Bixidda hawo ka timaadda guriga gudihiisa waxay horseedaysaa inay soo gasho saqafka taasoo kusababi karta arrimo jawiga caadiga ah, biyo xireenno baraf ah, iyo arrimaha qoyaanka. Daboolida meelaha siideenaya iyo ku darida dahaarka waxay hagaajineysaa adkeysiga guriga iyo keydinta tamarta. Qiimaha -R lagu taliyay: R - 50.
- 2 Nidaamka kuleylka:** Foornooyinka hawada lacadaadiyey ee caadi ahaan waxay jiri karaan 20 sano, kuleyliyeyaashu waa in la beddelaa 25 sano kadib Si loo kordhiyo keydinta tamarta, foornada waa in lagu beddelaa moodal leh waxqabad (AFUE) oo ugu yaraan ah 96% iyo koronto ku shaqeysa (ECM), iyo kuleeliyaha waa in loo casriyeeyaa qaab isu-ururin leh ugu yaraan 90% AFUE .
- 3 Dahaarka Darbiga:** Darbiyada leh dahaadh yar waa qabow iyo duleel. Darbiyada xirmooyinka cufan leh dahaadhku waxay yareeyaan duleelada guriga waxayna hagaajinayaan raaxada guriga. Tani waxay sidoo kale yareyn doontaa luminta tamarta waxayna keydineysaa lacag. Qiimaha-R lagu Taliyay: R - 11.
- 4 Daaqadaha:** Daaqadaha waa iney noqdaa labo-labo, ama hal-muraayad oo leh daaqadaha duufaanta. Dariishadaha duufaanka waxaa lagu dhejin karaa bannaanka daaqadaha hal-muraayad ah si lagu gareeyo kharash wax ku ool ah ee isticmaalka tamarta, loo yareeyo duleelada, loona hagaajiyo raaxada.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sameynta hagaajinta tamarta keydinta, la tasho Hagaha Tamarta Guriga ee Waaxda Ganacsiga ee Minnesota (<https://mn.gov/commerce/energy/conserving-energy/home-energy-guide/>) iyo Hoyga Tamarta Guriga ee Xarunta Tamarta iyo Deegaanka (<https://homeenergyhub.org>).



Biilkaaga Adeega

Maxaa ku jira Biilkaaga Adeega?

Biilashaada korantada iyo gaaska dabiiciga waxay leeyihiin dhowr nooc oo lacag ah. Kharashyada dhabta ah ee tamarta iyo walxaha biilasha way ka duwanaan karaan iyadoo ay kuxirantahay adeeggaada, laakiin waa kuwan aasaasiga.

Kharashka Adeegga

Khidmadda adeeggu waa khidmad bille ah oo aad bil kasta bixiso si aad tamarta ugu hesho. Xitaa haddii aadan isticmaalin wax tamar ah bil gudaheed, weli waxaa lagaa qaadi doonaa lacag si aad uheshid adeegga.

Kharashka Tamarta

Kharashka tamarta ee biilkaaga waa kharashka korantada ama gaaska aad isticmaashay. Waxaa lagu soo dalacayaa kiilowaat-saacaddii (kWh) koronto iyo kuleyliyaha gaaska dabiiciga ah. Adeeggaagu wuxuu akhriyaa mitirkaaga si loo go'aamiyo qadarka korantada ama gaaska dabiiciga ah ee la isticmaalay. Waxaad yareyneysaa kharashka tamartaada adoo adeegsanaya tamar yar!

1 Fahamka kilowatts (kW) iyo kilowatt-hours (kWh): kilowatts waa xaddiga isticmaalka tamarta; kiilowaat-saacaddii waa tiro tamar ah oo la isticmaalo. Tusaale ahaan, microwave waxaa laga yaabaa inuu isticmaalo koronto qiyaas ah 1 kilowatt (kW). Haddii microwave-kaas la isticmaalo 2 saacadood, wuxuu isticmaali doonaa 2 kilowatt-saacadood (kWh) oo koronto ah.

2 Fahamka therms: therms waa halbeeg ga kuleylka. Hal therm ayaa u dhigma ku dhowaad 29 kWh waxaana lagu bixin karaa qiyaastii 97 fuudh oo saddexjibaa ah oo gaaska dabiiciga ah.

Wadayaasha

Adeegyo badan ayaa sidoo kale kudara "wadayaal" biilkaaga. Wadayaasha waa lacag laga qaado dhinacyo gaar ah oo ka mid ah adeeggaaga tamarta, sida qiimaha shidaalka. Wadayaasha waxaa laga yaabaa inay ku saleysan yihiin inta tamarta aad isticmaasho ama waxay noqon karaan khidmad go'an oo bil kasta ah.

Canshuuraha

Ugu dambeyn, canshuuraha biilkaaga ayaa ku kala duwan hadba halka aad ku nooshahay. Canshuuraha waxay noqon karaan khidmad fidsan ama is bedbeddela.

Immisa ayuu yahay Biilkaaga Adeeggu?

Celcelis ahaan qoyska reer Minnesota oo ka kooban afar qof ayaa isticmaala qiyaastii 800 kWh oo koronto bil kasta waxayna bixiyaan qiyaastii \$ 100. Biilasha gaaska dabiiciga way kala duwan yihiin laakiin caadi ahaan waa \$ 100- \$ 200 bishii.

Haddii aad bixineyso wax badan intaas, waxaad awoodi kartaa inaad hesho dariiqooyin aad ku yareyn kartid tamarta oo lacag ku keydsato. Waxa kale oo dhici kara inuu khalad ku jiro biilkaaga.



Kaydinta Tamarta Guriga

Tilmaamo fudud oo ku saabsan kaydinta tamarta iyo lacagta guriga



Si aad u sameyso: Isku bedel nalalka LED-ga

Laydhka

Ku beddel nalalka dabka u baxa ee qaabkii hore CFLs nalka loo yaqaan 'LEDs' isla markaana demi nalal marka aadan joogin qolka ama marka aad isticmaali karto iftiinka dabiiciga ah. Raadi nalalka saxda ah adoo adeegsanaya tilmaamaha iftiiminta ee laga heli karo cleanenergyresourceteams.org/lighting

Kuleylka iyo qaboojinta

- Xilliga Wintarka, kadhiga heerkulbeeggaaga 68°F maalintii, oo hoos u dhig habeenkii iyo goortaad ka maqantahay. Fur daahyada daaqadaha /hareeyaha maalintii si qorraxdu uga caawiso kululeynta gurigaaga, oo xir habeenkii.
- Xilliga samarka, kadhig heerkulbeeggaaga 78°F oo isticmaal marwaaxadda sanduuqa fudud markaad ku jirto qolka si loo yareeyo kharashka qaboojiyaha. Xidho daahyada iyo hareeyaha maalintii oo fur dariishadaha habeenkii si aad uga faa'iidayso "qaboojinta bilaashka ah."
- Xusuusnow, ha isku dayin inaad kuleylliso ama aad qaboojiso guriga banaankiisa! Xidho daaqadaha iyo albaabada markaad daartid kuleeliyaha ama qaboojiyaha. Sidoo kale, hubi in meesha hawada kasoobaxdo ka banaantahay alaabta guriga ama carqaladaha kale si hawadu u wareegto.
- Hagaaji nidaamkaaga kuleylka sanad walba oo bil kasta beddel fiiltaraha kuleeliyaha.
- Ka cuffee gurigaaga qaboowga duleelada daaqadaha adigoo isticmaalaya walxo caag ah, duleelada masaska, xashiishka, iyo cufka cimilada ee albaabbada. Xir daaqadaha duufaanka ee albaabada iyo daaqadaha, sidoo kale



Si aad u sameyso: Hagaaji heerkulbeegga

Iska ilaali inaad isticmaasho kululeeyayaasha korontada ku shaqeeya.

Waa hab qaali ah oo lagu kululeeyo gurigaaga, qaarkoodna waxay u yihiin halista dabka. Haddii ay adag tahay in lagu kululeeyo gurigaaga ilaa 68°F mid la'aan, la xiriir Weatherization Assistance Program si aad u indha indheyso hagaajinta nidaamka kuleylkaaga ama dahaarka.



Kaydinta Tamarta Guriga

Tilmaamo fudud oo ku saabsan kaydinta tamarta iyo lacagta guriga

Talaabooyinka aad qaadi karto si aad u keydiso tamar badan

- Ku rakib heerkulbeeg la hagaajinkaro ama casri ah.
- Tixgeli inaad beddesho kuleeliyaha ama biyo karkariyaha haddii ay ku dhowdahay dhammaadka cimrigiisa la filayo (15-20 sano oo kuleeliyaha ah, 20-30 loogu talagalay biyo karkariyaha), ama uu ubaahan yahay dayactir, ama uu noqday waxtar la'aan.
- Ku rakib qalabka iyo qalabka ENERGY STAR.
- Ku yaree qarashyada biyo kululaynta iyo tubbada biyaha ee hawada kasaarta iyo midda qubeyska. Raadi calaamadda WaterSense.
- Hoos u dhig heerkulka kuleyliyahaaga ilaa 120°F si loo yareeyo isticmaalka tamarta loogana hortago gubashada.



Waa maxay Barnaamijka Caawinta Cimileynta? WAP waxay hagaajineysaa waxtarka tamarta ee guryaha qoysaska dakhliga uqalma, oo ay kujiraan kireystayaasha. Laga soo bilaabo dahaadhka ilaa nidaamyada kuleylka ilaa qalabka guryaha iyo waxyaabo kale oo badan, WAP waxay qaadaysaa qaab "guri dhan ah" oo lagu yareynayo qarashka ku baxa tamarta qoysaska iyo hagaajinta caafimaadka iyo badbaadada kireystayaasha iyo milkiileyaasha.

Raadi oo xir duleelada hawadu kabaxda oo kordhi dahaarka kuleel keediyaha

- Ku darista dahaarka oo ay weheliso gufeynta duleelada hawada kabaxdo, oo sidoo kale loo yaqaan cimileynta, ayaa yareyn karta qiimaha kuleylinta iyo iyo qaboojinta ilaa 15 ama ka badan boqolkiiba.
- Samee qiimeyn ku saabsan tamarta guriga si aad u hesho daloolada hawada iyo si aad u aragto inta dahaadh aad haysato
- Astaamaha caamka ah ee siideynta hawadda iyo dahaar xumad guriga waxaa ka mid ah duleelo qabow oo u dhow daaqaadaha iyo albaabada iyo qaybta hoose ee gurigaaga, iyo biyo xireennada barafka saaqfka saaran.

Talooyin dheeraad ah

- Ku dhaq dharkaaga biyo qabow oo nadiifi shabaga qalajiyaha dhaqid kasta.
- Ka bixi agabka korantada markii aan la isticmaalin ama isticmaal aaladda korontada yareysa.

Diyaar ma u tahay inaad qaado Talaabada Xigta?

1 Raadi haddii adeeggaadu bixiso qiimeynta tamarta, lacag-dhimista, ama walxaha tamarta lagu keydiyo.

2 Eeg haddii aad u-qalanto kaalmada cimileynta Ka raadi adeeg bixiyahaaga <https://mn.gov/commerce/energy/consumer-assistance/wap/>



Tixgeli Soolarka

Ma u shaqeyn kartaa tamarta qorraxda gurigaaga?

Haddii aad leedahay saqaf aan dadneyn ama dhul leh qorrax badan sannadka oo dhan, tamarta qorraxda ayaa kugu habboon adiga iyo gurigaaga. Tiknoolajiyada kale sida bamka kuleylka hawada, bamka kuleylka dhulka, iyo kuleyl keediyaha ayaa laga yaabaa inay si fiican u yareeyaan baahida loo qabo shidaalka loo baahan yahay si loo kululeeyo gurigaaga. Mid kasta oo ka mid ah teknoolojiyaddan ayaa adiga kugu habboon iyadooay kuxiran yahay isticmaalkaaga tamarta ama ilaha qorraxda ee laga heli karo bartaada. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa adeeggaada si aad u aragto ikhtiyaarrada kale sida qiimaha soolarka bulshada iyo cagaareenta. <https://www.cleanenergyresourceteams.org/simple-steps-solar>



ilaha kale

Waaxda Ganacsiga ee Minnesota

Tilmaantooda qotada dheer ee Tamarta Guriga waxay sahmisaa fursadaha kala duwan ee keydinta tamarta. <https://mn.gov/commerce/energy/conserving-energy/home-energy-guide/>

Xarunta Tamarta iyo Deegaanka

Hay'ad degan Minnesota ayaa bixisa Qalab Tamarta Guriga (<https://homeenergyhub.org>) iyo dhowr ikhtiyaar oo maalgelin ah oo loogu talagalay kobcinta tamarta (<https://www.mncee.org/loans/homes>).

Kooxaha Ilaha Tamarta Nadiifka ah ee (CERTs)

CERTs waa iskaashi ka dhexeeya gobolka oo dhan oo leh ujeedo ah in dadka iyo bulshadooda lagu xiro ilaha ay u baahan yihiin si loo helo loona hirgeliyo waxtarka tamarta ku saleysan bulshada, tamarta la cusbooneysiin karo, iyo mashaariicda gawaarida korontada ku shaqeysa. Inbadan <https://www.cleanenergyresourceteams.org>

Ku saabsan Taxanahan



Tilmaamahan wuxuu ka mid yahay taxane loogu talagalay in looga jawaabo su'aalaha guud ee tamarta guriga.

- Tamarta kireystayaasha: Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato
- Tamarta Mulkiilayaasha: Waxa Aad U Baahan Tahay Inaad Ogaato
- Tamar loogu talagalay guryaha wax soo saarka: Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato
- Tamarta loogu talagalay guryaha qoysaska kelida ah: Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Haddii aad xiiseyneyso inaad qaybiso hagahan, waxaa lagu calaamadeyn karaa astaantaada iyo macluumaadka xiriirkaada. Booqo linkiga hoose oo aad qeybta "Customize for my organization".

KA HEL HAGAYAASHA & QALABKA

CleanEnergyResourceTeams.org/Home